

2021-2022

Gacaliye Waalidka/Ilaaliyaha,

Greater Portland Health, oo kaashaneyso Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Westbrook, waxay daryeelka ilkaha siisaa Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Dugsiga Sare Westbrook.

Fadlan buuxi kaddibna saxiix foomka ilkaha ee ku lifaaqan iyo Ruqsadda xagga Kashifaadda Macluumaadka si loogu oggolaado ilmahaaga in uu adeegyada ilkaha ka helo dugsiga. **Fadlan xasuuso: waxaa loo baahan yahay labo saxiix: fadlan saxiix foomka diiwaan gelinta iyo foomka ruqsadda.**

Sheegashooyinka ceymiska waxaa loo gudbin doonaa adeegyada la bixiyo hadba sida lagu dabaqi karo. Haddii bukaanka uusan qabin ceymis, Greater Portland Health waxaa laga heli karaa adeega khidmadda ku xiran dakhliga.

#### **Adeegyada la Bixiyay**

Nadiifinta, flourideka, iyo buuxinta waxaa dhamaan Dugsiyada Portland ama Kliinikada Talbot (Riverton) ama Portland High Clinic iyo Dugsiyada Sare Westbrook ka bixiya aqoonyaanada nadiifinta ilkaha.

#### *Daaweynta*

Daweynta waxaa bixiya takhtarka ilkaha Barnaamijka Caafimaadka Afka Caruurta (Children's Oral Health Program) ama waxaa kormeera ardayda ilkaha UNE ee ku sugan kliinikada Dugsiga Sare Portland. Daweynta waxaa ka mid ah, balse kuma eka, baaritaanka ilkaha, raajada-x, flouride, buuxinta, daboolka (crown), iyo saaridda.

#### **Warqadahaan waxaad ku arki doontaa:**

- Foomka Isku Qoridda Ilkaha - *fadlan buuxi, saxiix, kaddibna u soo celi kalkaalinta dugsiga. Fadlan buuxi xattaa haddii cunugaada lagu qoray sannadkii la soo dhaafay bacdamaa loo baahan yahay macluumaadkii ugu dambeyay.*
- Ruqsadda Kashifaadda Macluumaadka – *fadlan saxiix kaddibna soo celi.*
- Ogeysiiska Asturnaanta Greater Portland Health - wuxuu ku yaal dusha warqaddaan - *waxaa loogu talagalay in aad haysatid.*

## **Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo**

**Ma jiraa kharash lagu bixiyo adeegyada ilkaha? Haa,** haddii ilhgu uu qabo ceymiska ilkaha, sida MaineCare, kharashka waxaa lagu dallici doonaa ceymiska. Caruurta aan qabin ceymiska ilkaha, waxay ku shaqeyaan adeega khidmadda ku xiran dakhliga soo gala reerka.

**Waxaad heli kartaa la-taliyeyaasha maaliyadda oo kugu kaalmeeyo in la ogaado haddii aad xaq u yeelan kartid ceymiska iyo, haddii kale, si loo fiiriyo qorshooyinka lacag bixinta iyo kharashka ku baxa adeegyada.**

**Kani may yahay barnaamijka dugsiga? Maya,** barnaamijku wuxuu ka shaqeyaa dugsiga, balse waxaa fulliya Greater Portland Health. Caruurta jirta inta u dhexeyso 6 bil ilaa 21 sanno waxay isku qori karaan barnaamijkaan.

**Ma loo baahan yahay in aan cunugeyga ku qoro haddii isaga ama iyada tahay bukaan ka qoran Greater Portland Health? Haa,** foomka diiwaan gelinta wuxuu noo ogol yahay in aan aragno ilmahaaga waqti uusan waalidka joogin.

**Maxaan sameyaa haddii ilmahaygu uu horay u tagay kliinikada? Fadlan** dhamaystir foomamka ku dhaggaan si loo cusbooneysiyo taariikhda caafimaadka loona fiiriyo siyaasadda asturnaanta kaddibna saxiix ruqsadda kashifaadda.

Fadlan soo wac **207-874-2141, Qorshaha 7** si aad u qabsatid ballan ama la xariir Kathy Martin, Maamulaha Brograamka Ilkaha Greater Portland Health, telefoonka (207) 874-2141 x 8401 ama [kmartin@greaterportlandhealth.org](mailto:kmartin@greaterportlandhealth.org) si aad u heshid macluumaad badan. Caafimaadka Portland waa xarun caafimaadka uu federaalka aqoonsan yahay, ujeedadeedana tahay in ay bixiso daryeel caafimaad tayo sare oo ku wajahan bukaanka, la heli karo, la awoodo, iyo dareensan hiddaha. Si aad u heshid macluumaadka ku saabsan Greater Portland Health, fadlan wac (207) 874-2141 ama booqo boggena internetka: <http://www.greaterportlandhealth.org/>

## Diiwaan Gelinta Xarunta Caafimaadka Ku Saleysan Dugsiga Caafimaadka Greater Portland

### Foomka Ruqsadda ee Isticmaalka iyo Kashifaadda Macluumaadka Daryeelka Caafimaadka

Marka aan hoos saxiixo hoos, waxaan qiraya oo oggolaanaya waxa soo socda, xagga diiwaan gelinta ilmahayaga Xarunta Caafimaadka Ku Saleysan Dugsiga Greater Portland ('Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH') iyo kashifaadda diiwaanka caafimaadka ilmahayga iyo macluumaadka la xariira.

- Anigu waxaan helay oo akhristay Ogeysiiska Dhaqanka Macluumaadka Caafimaadka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH ee kala talliya isticmaalka iyo kashifaadda lagu sameeyo macluumaadka caafimaadka ee ku jira diiwaankeyga caafimaadka ilmahayga, sida waafaqsan heerarka qarsoodiga HIPAA.
- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in uu galo diiwaanka caafimaadka Dugsiga ilmahayga, oo ey ku jirto balse aan ku ekayn diiwaanada jirka, dabecadda, iyo la-tallinta haddii ay jirto, iyo macluumaad kasta oo la xariira, loona isticmaalo ujeedooyinka la xariira daaweynta ama sida uu rabo ama uu ogol yahay sharciga sida ay go'aan ku gaarto Xarunta Caafimaadka GPH.
- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in ay Dugsiga (kana mid ah kalkaalinta iyo shaqaalaha bulshada) siiso macluumaadka laga soo qaaday diiwaanada Xarunta caafimaadka Dugsiga GPH hadba sida loogu baahan yahay iyo sida ku habboon ujeedooyinka la xariira daaweynta ama sida loo baahan yahay ama sida sharcigu ogolyahay sida ay go'aan ku gaarto Greater Portland Health.
- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in ay macluumaadka ku jira diiwaanaada Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH (kana mid ah diiwaanada caafimaadka Dugsiga haddii uu ku jiro diiwaanka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH) la qeybsato takhaatiirta kale ee ku hawlan daaweynta iyo bixiyeyaasha kana mid ah bixiyeyaasha daryeelka aasaasiga, takhaatiirta ilkaha, iyo Xirfadlaha caafimaadka Dhimirka, in ay fududeyaan daryeelka caafimaadka ee la siiyo Ilmahayga.
- Anigu waxaan u fasaxay bixiyaha daryeelka ilmahayga, takhtarka ilkaha, iyo Xirfadlaha caafimaadka dhimirka ("Bixiyeyaasha Dhinaca Saddaxaad") in ay bixiyaan macluumaadka caafimaadka iyo diiwaanada siiyaan Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH si loo fududeeyo geynta daryeelka caafimaadka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH ee la siiyo ilmahayga. Anigu waxaan fahamsanahay in ay dhici karto in Bixiyeyaasha Dhinaca Saddaxaad i weyddiyaan in aan siiyo ruqsad gaar ah si aan u ogolaado kashifaadda diiwaanada la xariira daaweynta ay fulliyaan Bixiyeyaasha Dhinaca Saddaxaad.
- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in uu sii daayo macluumaadka laga soo qaado diiwaanada Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in loo baahan sii biilasha loogu dallaco ceymiska ama bixiyeyaasha kale.
- Anigu waxaan fahamsanahay oo aan oggolahay in: (i) Oggolaanshahaani shaqeyn doono muddo hal sanno laga bilaabo taariikhda saxiixa haddii aysan jirin muddo gaaban; iyo (ii) waxaan la noqon karaa ruqsaddaan waqti kasta marka la gudbiyo ogeysiis qoran oo ku saabsan la noqoshada ruqsadda; marka laga reebo marka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH isku haleeyo ogolaashada asalka.

✍️ **Saxiixa Waalidka/Ilaaliyaha:** \_\_\_\_\_

Taariikhda: \_\_\_\_\_

Daabac Magaca: \_\_\_\_\_

Xariirka ka Dhexeeyo: \_\_\_\_\_

**Foomka Diiwaangelinta Barnaamijka Ilkaha 2021-2022**

Magaca ilmaha \_\_\_\_\_ Taariikhda Dhalashada \_\_\_\_/\_\_\_\_/\_\_\_\_ Jinsiga \_\_\_\_\_  
(la mid ah Kaarka MainCare haddi ay suurtagal tahay)

Cinwaan \_\_\_\_\_ Summada Boostada \_\_\_\_\_

Taleefonka maaliintii waalidka lagala xidhiidhi karo \_\_\_\_\_ Fariin/Qoraal waayahay Haa/Maya

Teleefonka gacanta ee ardayga (xususin) \_\_\_\_\_ Fariin/Qoraal waayahay Haa/Maya

limayl \_\_\_\_\_ Magaca Dugsiga \_\_\_\_\_ Macallin/Fasalka \_\_\_\_\_

Lambarka Aqoonsiga MaineCare (wuxu ku dhammaada A) _____ Caymiska Gaarka ah ee ilkaha: Magaca Shirkadda _____ Aqoonsiga Heeshiska Caymiska# _____ Koox # _____ Cinwaanka Dalabka _____ Magaca qofka Heeshiska Caymiska haysta _____ Taariikhda Dhalashada qofka Heeshiska Caymiska haysta _____	_____ Aan caymis lahayn (fadlan ✓)
Magaca damiinka (qofka mas'uulka ka ah kharashka) _____ Taariikhda Dhalashada: _____	

**Ilmahaagu weligiis ma yeeshay mid ka mid ah kuwan soo socda? Fadlan calaamadee dhammaan kuwa quseeya.**

- |   |   |   |  |
|---|---|---|--|
| <input type="checkbox"/> ADD/ADHD*                                    | <input type="checkbox"/> Kansar/Burooyin      | <input type="checkbox"/> Cudurka Wadnaha                      | <input type="checkbox"/> Daryeelka maskaxda              |
| <input type="checkbox"/> Xanuunka AIDSka/HIVga                        | <input type="checkbox"/> Sarco oo Maskaxda ah | <input type="checkbox"/> Cagaarshow                           | <input type="checkbox"/> caabuqa galmada lagu kala qaado |
| <input type="checkbox"/> Neefta                                       | <input type="checkbox"/> Faruur /dhanxanag    | <input type="checkbox"/> Isnadaamis                           | <input type="checkbox"/> Dhibaatooyinka Hadalka/Maqalka  |
| <input type="checkbox"/> Xanuunka Autisamka/xanuunka cillada Asperger |   |   |  |
| <input type="checkbox"/> Cudurka Wadnaha ee Lagu dhasho               | <input type="checkbox"/> Dhiig-kar            | <input type="checkbox"/> Dhibaatooyinka Caloosha iyo Xiidmaha |  |
| <input type="checkbox"/> Cilladaha Dhalashada                         | <input type="checkbox"/> Nooca Sonkorowga     | <input type="checkbox"/> Xanuunka Kelyaha                     | <input type="checkbox"/> Qaaxada                         |
| <input type="checkbox"/> Jirro Dhiiga ah                              | <input type="checkbox"/> Suuxdin/Qallal       | <input type="checkbox"/> Xanuunka beerka                      | <input type="checkbox"/> Mid kale                        |

\*Khalkhalka hos u dhiga Feejignaanta / Khalkhalka hos u dhiga Feejignaanta oy weheeliso salfadayd hog ah

Ilmahaagu ma leeyahay wax xasaasiyad ah? Sharax \_\_\_\_\_

Liis garee daawooyinka uu ilmahaagu qaato \_\_\_\_\_

Ilmahaagu ma leeyahay ilko xanuun? Haa May Ilmahaagu miyuu arkay dhakhtarka ilkaha sannadkii la soo dhaafay? Haa Maya

Haddii ay haa tahay, halkee? \_\_\_\_\_

Luqadda lagaga hadlo guriga \_\_\_\_\_

Jinsiyada Ilmaha \_\_\_\_\_ Cadaan \_\_\_\_\_ Madow, Afrikaan, Afrikaan Ameerika \_\_\_\_\_ Jasiirad kale oo Baasifik ah \_\_\_\_\_ Aasiyaan  
 \_\_\_\_\_ Koofurta/Bartamaha/Hindida Waqooyiga Ameerika, Dhaladka Alaska \_\_\_\_\_ Asal ahaan Hawaiiian  
 \_\_\_\_\_ Dhaqamo badan ka so jeeda

Jinsiyada Ilmaha: \_\_\_\_\_ Isbaanish/Laatiin \_\_\_\_\_ Ma aha Hisbaanik/Laatiino

Tirada guud ee xubnaha qoyska ee ku nool guriga: _____	Wadarta dakhliga ee qoyska so gala sannadki: _____
Magaca madaxa qoyska: _____	Xiriirka u lalle yahay ardayga: _____

**Oggolaanshaha in la isticmaalo Barnaamijka Caafimaadka Afka Carruurta ee Greater Portland Health iyo Oggolaanshaha Siidevnta Macluumaadka**

Markaan saxiixo foomkan, waxaan qirayaa oo fahansanahay waxa so socda:

- Waxaan helay oo aan akhriyey waraaqda Barnaamijka Ilkaha ee Dugsiga Ku-saleysanee Greater Portland Health (“GPH”) ee ku aadan waaliidinta yo Su’aalaha Inta Badan La Is-Weydiyo, kaas oo sharxaya waxa uu yahay Barnaamijka Ilkaha ee Dugsiga Ku-saleysan ee GPH iyo adeegyada iyo faa’iidooyinka ay siin karaan ilmahayga.
- Barnaamijka Ilkaha ee Dugsiga Ku-saleysan ee GPH waa qayb ka gooni ah dugsiga iyo xafiiska kalkaalisada dugsiga. Barnaamijka Ilkaha ee Dugsiga Ku-saleysan ee GPH wuxuu bixiyaa qiimaynta ilkaha iyo noocyo kala duwan oo daaweyn iyo daryeel caafimaadeedka afka ah. Qeybtaas waxay ku dhex taal dugsiga, waxayna la xiiriirta bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee kale oo laga yaabo inay ku lug yeeshaan daryeelka ilmahayga.
- Oggolaanshahani wuxuu shaqaynayaa muddada ardaygu ka diiwaangashan yahay Nidaamka Dugsiga Portland ama ilaa lo beddelayo dugsi kale (yacni, laga bilaabo dugsiga dhexe ilaa dugsiga sare). Marka ardaygaygu ka gudbo dugsiga dhexe una gudbo dugsiga sare, waa inaan dib u qoro barnaamijka Ilkaha ee Dugsiga Ku-saleysan haddii aan la jeclaado inay sii wataan helitaanka adeegyada Barnaamijka Ilkaha ee Ku-saleysan Dugsiga ee GPH.
- Waxaa la iga raba inaan dib-u-eego oo saxiixo Foomka Oggolaanshaha sii lo-Isticmaalo loona bixiyo Macluumaadka Daryeelka Caafimaadka ee la xiriirta diiwaangelinta ilmahayga ee Barnaamijka Ilkaha ee ku-saleysan Dugsiga ee GPH.

Waxaan si buuxda u akhriyey foomkan waxaanan oggolaaday inaan qoro ardaygayga Barnaamijka Ilkaha ee Dugsiga Ku-saleysan GPH ee waqtigan.

➤ Saxiixa Waalidka/Masuulka: \_\_\_\_\_ Taariikh: \_\_\_\_\_

Magaca oo farta waween ku Daabacan: \_\_\_\_\_ Taariikhda Dhalashada \_\_\_\_-\_\_\_\_-\_\_\_\_ Xiriirka \_\_\_\_\_